Haddii sabab uun codsiga Oggolaanshaha aan la aqbalin laakiin aad rumaysan tahay inaad xaq u leedahay, waxaad rafcaan ka qaadan kartaa maxkamadda caadiga ah (Qaybta La gaaryeelay) ee meesha aad degen tahay.
Sharcigu waxa uu u baahan yahay in fiisa lagu soo saaro **30 maalmood** oo codsiga ah, laakiin waay ka dheeraan kartaa. Halkan mar labbaad, haddii codsiga fiisaha la diido, waxaad leedahay xaqa aad rafcaan kaga qaadato maxkamadda ay khusayso.

## Waa imsa qiimaheedu?

- → Tigidhada.
- → Kharashyada wixii wareegitaan imaanshaha ah iyo warqaddaha caddaymaha sharciga ah ee caddaynaya xidhiidhka qaraabo ee qoyska.
- → Baadhitaanka **DNA** haddii aad dib ula midowdo ilmahaag yar oo aanay jirin wax warqaddo kale oo caddaymo ansaxa ah si loo ogaado xidhiidhka qoyska ee qaraabeed.
- → Fiisaha.
- → Tigidhada safarka ilaa Talyaaniga.

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Waxaad ka heli kartaa macluumaad aad u faa'iido badan websaydka **www.ricongiungimento.it**

**www.ricongiungimento.it**

For more information:

NUMERO VERDE
PER RICHIEDENTI ASILO E RIFUGIATI
800905570

FEDERNOTAI
Il Sindacato dei Notai Italiani
www.federnotai.it/iohodiritto

OIM
UN MIGRATION
Tel. 06441609 225/233/260
**https://italy.iom.int/it**

For family tracing:

**CROCE ROSSA ITALIANA**
tracing@cri.it
www.tracetheface.org
NUMERO VERDE GRATUITO
800 065510

grafica: digimedia.it - illustrazioni: zonecreative.it

Caritas Italiana
consorzio communitas
UNHCR The UN Refugee Agency

# FamilyFIRST

## in Italia insieme alla tua famiglia



Dib u midowga qoyska ee ka faa'iidaystayaasha ilaalinta caalamiga ah

# Waa Maxay Dib ula midow ama keenida qoysku?

Dib ula midowga qoyska waa nidaamka kaas oo kuu oggolaada adigu inaad keento xubnaha qoyskaaga ilaa Talyaaniga, qaab sharci ah, oo amaan ah.



## Xubnahee qoyska ayaa iman kara Talyaaniga?

Waxaad codsan kartaa dib u midowga qoyska xubnaha qoyska soo socda:

- **Xaaska** (ninka ama gabadha xaaska ah) aan sharci ahaan kala maqnayn oo aan ka yarayn 18, ama lamaanaha madaniga ah (gudaha Talyaaniga ama dibada jooga), ajnabi oo aan deganayn Talyaaniga.

- Carruurta **da'da yar**, la korsaday, la isku aaminay, la ilaaliyay, ay ka mid tahay xaaska ama midka aan ku dhalan meher aan xaas ahayn, haddii waalidka kale, haddii ay wax jiraan, uu bixiyay oggolaanshahiisa/keeda.
- Carruurta waa wayn ee ku tiirsan haddii aanay awoodin inay inay buuxiyaan baahiyahooda aasaasiga ee asbaabaha ansaxa ah oo si buuxda ay naafo u yihiin.

- **Waalidka** ku tiirsan ilaa da'da 65, haddii aanay lahayn carruur kale gudaha wadankooda asalka ah ama meesha ay ku dhasheen.
- Waalidka ku tiirsan ee ka wayn 65 sanadoo da'da, haddii ay sidoo kale leeyihiin carruur kale laakiin aanay awoodin inay taageeraan nafahooda iyaddoo ay sababtay mida qoran, ee asbaabaha halista caafimaadka.

<u>Haddi aad **ka yar tahay 18** oo aad keligaa tahay, waalidkaa kala maqan tihiin ama xubnaha qoyska ee kale kuwaas oo adiga ku daryeela oo lagu aqoonsaday sidii qaxooti degen talyaaniga, waxaad xaq u leedahay inaad dib ula midowdo waalidkaaga da'dooda iyo xaaladaba.</u>

## Maxaan u baahanahay si aan u awoodo inaan dalbado dib u midowga ama keenida qoyska?

- Sharciga oggolaanshaha degenaanshaha: waa inuu ansax ahaadaa ama dib loo cusboonaysiiyay. Xaaladan, codsiga waa in lagu sameeyo gudaha **60 maalmood** oo muddada dhicitaanka ah.
- Baasaboorka ama warqadda safarka (haddii la heli karo).
- Warqaddaha caddaynta xidhiidhka qaraabo ee qoyska, da'da ilmaha yar iyo heerka sharci ee qoyska (haddii la heli karo).

Maadaama aad hoos imanayso ilaalinta caalamiga ah, lagaagama baahna inaad buuxiso shuruudaha dakhliga iyo u qalmida guriga ee muwaadiniinta ajaanibka ah ee aan Midowga Yurub ku jirin.

## Sideed u bilaabi karaa nidaamka keenida ama dib ula midowga qoyska?

Nidaamku waxa uu ka kooban yahay labba tallaabo, codsiga Oggolaanshaha ee xafiiska Miiska Laanta socdaalka ee Degmadda ay la xidhiidho iyo ka dib codsiga iyo fiisaha ka soo baxay safaarada Talyaaniga ee wadanka dibadiisa ku taala.

Si aad u oggolaanshaha u hesho waa inaad:
- Heshaa aqoonsiga dhijitaalka ah ee SPID (waxaad ka heli kartaa xafiiska boostadda Taltaaniga).
- Iibso tigidhka shaambada €16.
- Isticmaal SPID si aad u gasho qaybta habboon ee websaydka **www.nullaostalavoro.dlci.interno.it**, ku buuxi codsiga onlayn oo geli lambarka shaambada ama tigidhka aad haysato.

Waxaa ka dib laguugu yeedhi doonaa miiskaaga Xafiiska Laanta Socdaalka, halka aad u baahan tahay inaad keento warqaddaha soo socda:

- Asalka shaambada lambarkeeda aad gelisay codsiga onlaynka ah.
- Shaambada kale oo €16 oo lagu dhejinaayo warqadda Oggolaanshaha.
- Oggolaanshahaaga degenaanshaha iyo sawirkeeda koobiga ah.
- Warqadda footokoobiga sawirada xubnaha qoyska ah ee la keenayo (haddii la heli karo).

Xaqiijinta xidhiidhka qoyska waxaad keeni kartaa shahaadad isku jirta oo heerka qoyska ah iyo degenaanshaha (xataa qaabka ah iskaa u caddayn ah).

Markaad hesho oggolaanshaha, waa inaad u dirto shahaadadada asalka ah xubinta qoyska aad dib ula midoobayso, taas oo tegaysa xafiiska diblomaadiyeed ama safaarada talyaaniga ee la xidhiidha si ay u codsadaan fiisaha, kaasoo wakhtigaa xafiisku ku helay qaab koronto ahaan ama iimayl ahaan oo uga timid Miiska Xafiiska laanta Socdaalka.

Waxaad heli doontaa wada xidhiidhka qoran oo wata lambarka telefoonka xafiiska Miiska Laanta socdaalka aad la xidhiidhi karto si loo habbeeyo kullanka labbaad ee xubnaha qoyska. Xaqiiqo ahaan, laga bilaabo daqiiqada uu qoyskaagu soo galo Talyaaniga, waxaad haysan doontaa 8 maalmood oo aad la xidhiidho miiska Xafiiska Socdaalka si aad u qorshaysato kullan aad ku codato oggolaanshaha degenaanshaha.

## Ilaa imisay qaadanaysaa?

Haddii wax kasta aad sax u qabato oo codsigaaga la aqbalo, gudaha **90 maalmood** laga bilaabo taariikhda gudbinta waxaad heli doontaa Oggolaanshaha loo baahan yahay si aad u sii wado keenida qoyska.